

## Maxaa ku xiga ?

Waxaanu qaban doonaa kulanka koowaad, wakhtiga kuu fiican adiga, isla markaana hadii aad wax su'aal ah qabtid ha ka biqin in aad wax waydiiso. Waanu ku faraxsanahay in aanu ku caawino.

[astaanta u gaarka ah daabacaada yaryar] Waxaa sawiray Tom Hull. Sawirka ilmahu waa model.  
[astaantu waxaa gaar u leh ] NSPCC 2015 iyo 2017. Registered charity England and Wales  
216401. Scotland SCO37717. J20151094

# Qaabka 2 ee heerka daryeelka

CABIRAADA DARYEELKA, CAAWIMADA QOYSKA

**Hagida waalidka**

La cusboonaysiiyey 2017



**NSPCC**


EVERY CHILDHOOD IS WORTH FIGHTING FOR

# Waa maxay?


Waxaa jira waxyaabo badan oo aad ka fekertid markaad waalid tahay. Waana muhiim inaad fahamtid waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Wadajir ahaantiin adiga iyo shaqaalahaaga, waxaad eegi doontaan waxyaabaha sida caafimaadka, cuntada, dharka, nadaafada, daryeelka dareenka, iyo saacidaada aad siisid ilmahaaga (hadba da'diisu intay tahay) sida dhinaca ciyaarta, skuulka iyo asaxaabta.

Way idin caawinaysaa adiga iyo shaqaalahaaga inaad ogaataan waxyaabaha aad ku fiicantahay ama waxyaabaha aad u baahan tahay in lagaa siiyo .




CAAFIMAADKA



CUNTADA



CIYAARTA



DHARKA



NADAAFADA

# Siday u shaqaysaa

Si wadajir ah waxaad u eegi doontaan siyaabaha kala duwan ee waalidnimada iyo lahaansha qoyska –taas oo la qiyaasayo waxyaabaha aad ku fiicantahay iyo waxyaabaha aad ogaatay inay kugu yara adag yihiin. Qaabka 2 ee heerka daryeelka waxay isticimaalaan dhibco ama buundo kaa caawinaysa sidaad u fahmi lahayd heerka wanaagsan ee waxwaliba kuu marayaan sida dhinacwalba ilmahaaga daryeelkiisu yahay.

Waxaa kale oo go'aaminaya buundooyinkaaga qofka kuu shaqeeya ,oo kuu sharixidoona , adiguna waxaad helaysaa fursad aad buundooyin isa siisid. Haddii ilmahaagu awoodo oo uu rabo way samayn karaan.

Buundooyinka waxaa laysa siin doonaa mudo gaaban gudaheed,waxaa kale oo hadana buundooyinka la bixin doonaa dhowr bilood kadib si loo ogaado siday wax u isu bedeleen.



- 1 Waa wax fiican – ma helin si kasii fiican.
- 2 Waa si fiican.
- 3 Waa iska fiican yahay,laakiin waxaa laga yaabaa inaad u baahantahay caawimo si aad uga sii fiicnaato
- 4 Ma fiicna, micnaheeduna waa in aad wax isbedel ah samaysid.
- 5 Waa arrin welwel leh taasoo ah in isbedel la sameeyo waxaana loo baahan yahay in waxyaabo badan la hagaajiyo.

Waxaa taas loo samaynayaa in la arko daryeelka aad siinasid ilmo keliya. Laakiin haddii ilmahaagu ka badan yihiin mid markaa iyagana waa loo samaynayaa sidaa darteed ilmo waliba wuxuu lahaan doonaa buundooyin kiisa.

